TAXANAHA EREYBIXINTA TEKNOLAJIYADDA

Qaybta 1aad: Amniga Saybarka

Sebteembar **2026**

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
الهيئة الوطنية للإتصالات
National Communications Authority

TAXANAHA EREYBIXINTA TEKNOLAJIYADDA

Qaybta 1aad:
Amniga Saybarka

Sebteembar 2026

HORDHAC GUUD

Buugyarahan waxaa ku diyaarsan ereybixinta Amniga Saybarka, wuxuuna ugu horreeyaa taxane ereybixineed oo teknolajiyadda ah. Waxaa taxanaha loogu talaggalay sidii ereybixin af Soomaali ah loogu sameyn lahaa teknolajiyadda.

Hawshan ereybixinta qaybteeda koowaad, ee ku saabsan Amniga Saybarka, waxaa iska kaashaday Akademiye Goboleedka af Soomaaliga (AGA), Akadeemiyadda Cilmiga Dhaqanka iyo Suugaanta, iyo Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ). Kulan daahfur ah oo lagu qabtay xarunta akadeemiyadda AGA, ayaa lagu soo jeediyay in la dhiso guddi hawshan ereybixinta ka soo shaqeeya, kana kooban saddexda hay'adood. Waxaa la magaacabay guddi xeeldheerayaal iyo afyaqaanno ah, oo ka kooban sagaal xubnood. Waxaa loo xilsaaray inay ereybixin af Soomaali ah u sameeyaan 162 erey oo ku saabsan Amniga Saybarka.

ujeedadda ereybixinta laga leeyahay waxaa ka mid ah, in bulshada afkeeda loogu qeexo ama loogu diyaariyo waxyaabaha cusub ee adduunka ku soo kordhaya. Sidoo kale, arrintani waxay fududaynaysaa in aqoontu ay si fudud bulshada ugu gudubto, waxayna wax ka taraysaa ilaalinta, horumarinta iyo kobcinta afka hooyo iyo inuu noqdo af cilmiyaysan.

GUDDIGA EREYBIXINTA

1	Prof. Cabdalla Cumar Mansuur	Guddoomiye
2	Axmed Cabdi Axmed	Guddoomiye kuxigeen
3	Maxamed Xaaji Cabdulqaadir	Xubin
4	Cabdulqaadir Cabdulle Diini	Xubin
5	Cabdiweli Maxamed Sh. Cumar	Xubin
6	Cabdirisaaq Baraag Axmed	Xubin
7	Cabdulqaadir Cabdi Axmed	Xubin
8	Naasir Maxamed Muuse	Xubin
9	Nasro Cabdi Cusmaan	Xubin



AKADEMIYE GOBOLEEDKA AF SOOMAALIGA (AGA)

Siciid Saalax Axmed
Guddoomiyaha Akademiye Goboleedka af Soomaaliga (AGA)

Horumarka joogtada ah ee dunida ka socda, wuxuu xilli kasta soo kordhiyaa wax cusub oo la soo saaray ama aragti cusub oo la curiyay. Sida qofka dhashay loogu magac bixiyo, ayay walaxdaa ama aragtidaa ugubka ahi ugu baahantahay magacbixin. Waa waxa loo yaqaan “ereybixin”. Horumarka xawliga ku socda, waxaa kow ka ah tiknoolajiyadda qaybaheeda kala duwan. Dunida oo u sii guuraysa adeegsiga internetka iyo dhijitaalka, Amniga Saybarku wuxuu ka mid yahay qaybaha tiknoolajiyadda cusub caaradka ugu jira, looguna baahi badanyahay. Waxaa loogu talaggalay in lagu ilaaliyo, loogana hortago wax kasta oo dhib ama halis ku ah bulshada nolosheeda, dhaqaaleheeda, xogteeda iyo wixii la mid ah. Sidoo kale, sidii ay si badqabta ugu adeegsan lahaayeen tiknoolajiyadda, sida internetka, baraha bulshada iyo inay si nabadqabta isugu gudbiyaan xogaha gaarka ah iyo macluumaadka ganacsiga iyo wax-isweydaarsiga.

Si ay bulshada Soomaaliyeed dunida ula jaanqaaddo, waxaa lagama maarmaan noqotay in afkooda loogu qeexo ama loogu diyaariyo waxyaabaha cusub ee adduunka ku soo kordhaya, sida Amniga Saybarka. Arrintani waxay fududaynaysaa in aqoontu ay si fudud bulshada ugu gudubto. Sidoo kale, tallaabadani waxay wax ka taraysaa ilaalinta, horumarinta iyo kobcinta afka hooyo iyo inuu noqdo af cilmiyaysan.

Iyadoo arrimahaas laga duulayo, waxay Hay’adda Isgaariisnta Qaranku bilowday qorshe taxane ah oo ereybixinno loogu

samaynayo tiknoolajiyadda. Latashiyo ka dib, waxay hay'addu u aragtay in taxanaha ereybixinnada lagu bilaabo Amniga Saybarka. Latashiyadaa waxaa ka dhashay in Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Akadeemiya Goboleedka af Soomaaliga (AGA) iyo Akadeemiyada Cilmiga, dhaqanka iyo Suugaanta ay iska kaashadaan sidii loo diyaarin lahaa ereybixin ku saabsan Amniga Saybarka. Kulan saddexgees ah ka dib, waxaa la magaacabay guddi xeeldheerayaal iyo afyaqaanno ah oo saddexda hay'adood ka tirsan. Guddigaa waxaa loo xilsaaray inay ereybixin af Soomaali ah u sameeyaan, in ka badan, 150 erey oo ku saabsan Amniga Saybarka.

Guddiga oo ku shaqeynayay xarunta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, waxay hawshooda bilaabeen 09-kii Juun 2026. Waxay isla garteen inay toddobaadkii labo maalmood kulmaan, ereybixintana ku dhammeeyaan muddo bil iyo bar ah. Shaqada ereybixintu waxay ku bilaabantay si habsami ah, xeeldheerayaashuna waxay muujinyeen karti, hufnaan, hawlkarnimo iyo hal-abuur, taas oo fududaysay in wax walba ku dhammaadaan sidii loogu talaggalay.

Akadeemiya Goboleedka af Soomaaliga, oo ah xarun loo abuuray daryeelka iyo horumarinta af Soomaaliga, himiladeeduna tahay afka oo halista ka badbaada, adeegsigiisana la xoojiyo, waxay ku faraxsan tahay kaqaybqaadashada hawshan ereybixinta. Waxay horey qayb uga ahayd hawlo ereybixin ah, sida ereybixintii Garaadgacmeedka, xisaabaadka iyo maamulka iyo kuwo kale oo ku xusan qorshahawleedkeeda. AGA waxay diyaar u tahay inay qayb libaax ka qaadato wax kasta oo lagu horumarinayo afka, iyo dadaal kasta oo loogu talaggalay abuuridda ereybixinno ku saabsan farsamooyinka cusub ee dunida ku soo kordhaya. Waxay akadeemiyaddu bogaadinaysaa ereybixinta Amniga Saybarka,

waxayna u mahadcelinaysaa afyaqaannadii iyo xeeldheerayaashii ka qaybqaatay hawshan ereybixinta. Waxay si gaar ah ugu mahadnaqaysaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo curinta hawshan ereybixinta lahayd, kuna martigelisay in xaruntooda lagu qabto. Sidoo kale, barasare Cabdalla Cumar Mansuur oo shaqada ereybixinta lafdhabar u ahaa, guddoomiyana u ahaa guddiga ereybixinta.

Waxaan rajeynaynaa in buugyaraha soo baxaa, uu wax ka dabooli doono baahida bulshadu u qabto Amniga saybarka. Sidoo kale, inuu noqdo bilow fiican oo dhiirriggeliya ballaarinta ereybixinta, kana faa'iidaytaan dadka ka shaqeeya ama ku shaqeeya, amaba daneeya Amniga saybarka.

Wadashaqayn Wacan.



AKADEEMIYADDA CILMIGA DHAQANKA IYO SUUGAANTA

Ismaaciil Yuusuf Cusmaan
Guddoomiyaha Akademiyadda
Cilmiga Dhaqanka iyo Suugaanta

Afku waa weelka xanbaara aqoonta, dhaqanka iyo taariikhda. Haddaba, xilli dunidu ay noqotay madal tiknoolajiyadeed, nolosha aadanahuna ay inta badan u wareegtay fagaarayaasha dhijitaalka ah, waxaa daruuri noqotay in afkeenna hooyo loo diyaariyo ereybixin awood u siinaysa inuu la jaanqaado isbeddeladaas xawaaraha ku socda ee dhinaca tiknoolajiyada. Mabaadi'da asaasiga ah ee Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka iyo Suugaanta waxaa safka hore kaga jira ilaalinta, horumarinta, casriyeynta iyo cilmiyeynta afka Soomaaliga. Sidaa darteed, ereybixintu waa aasaaska ay ku dhisanto tayada af leeyahay. Haddii aanu afkeennu hodan ka noqon ereycilmiyeedyo, ma samaysan karo sharciyo, siyaasado, ama agab waxbarasho oo ku saabsan tiknoolajiyada, bulshadeenuna fahmi karto.

Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka iyo Suugaanta waxaa sharaf u ah in ay door muhiim ah ka qaadato taxanaha ereybixinta tiknoolajiyada, taasi wejigeeda kowaad la diyaariyey ereybixinta amniga saybarka. Ereybixintan amniga saybarka waxaa loo habeeyey si nidaamsan, iyada oo erey kasta lagu lifaaqay qeexitaankiisa, waxayna gacan ka geysanaysaa mideynta isticmaalka ereyada farsamada, yaraynta jahawareerka ka dhasha tarjumaadaha iyo horumarinta afka Soomaaliga ee dhinacyada sayniska iyo tiknoolajiyadda. Akademiyadu waxay rumaysan tahay in horumarinta ereybixintu ay tahay hawl joogto ah oo u baahan wadatashi iyo kaqaybgalka xeeldheereyaasha afka, khubarada amniga saybarka, iyo hay'adaha kale ee ay khusayso.

Sidaas darteed, buuggani wuxuu noqonayaa saldhig aqooneed oo la sii kobcin doono, lana jaanqaadi doono isbeddellada joogtada ah ee ka dhaca cilmiga amniga saybarka.

Guddi ahaan iyo maamul ahaanba, waxaan rumeysanahay in amni saybar oo sugan aan laga heli karin bulshada dhexdeeda, haddii aan marka hore ereyada iyo fikradaha amnigaas ku saabsan lagu baahin afka ay bulshadu ku hadasho kuna fikirto. Waxaan si weyn u bogaadinayaa dadaalka hagarla'aanta ah ee ay muujiyeen khuburada afka, iyo hawlwadeenada kale ee hawshan kor loogu qaadayo tayada afkeenna hooyo ee dhinaca tiknoolajiyada. Waxaan ku dhiirigelinayaa dhammaan bulshada Soomaaliyeed in ay si dhab ah u adeegsadaan ereybixintan, si ay qayb uga noqoto kaydka rasmiga ah ee aqoonta Soomaaliyeed.

'Afkeennu waa aqoonteenna, amnigiisuna waa amnigeenna'.



HAY'ADDA ISGAARSIINTA QARANKA

Mustafa Yaasin Sheekh
Maareeyaha Guud
Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

Afku waa aaladda lagu gudbiyo aqoonta, dhaqanka iyo waayo-aragnimada bulshada, xilligan tiknoolajiyada casriga ah ayaa lafdhabar u noqotay horumarka dhaqaalaha iyo kobcinta adeegyada bulshada, sidaa darteed waxaa lama huraan ah in afkeenna hooyo loo diyaariyo ereybixin awood u siinaysa in uu la jaanqaado horumarka degdegga ah ee sayniska & teknoolajiyada casriga ah, si gaar ah waxa lagama maarmaan ah in aqoonta, fikradaha iyo arrimaha la xiriira teknolojiyada oo ay ku jirto tan amniga saybarka lagu cabbiri karo af ay bulshadu si fudud u fahmi karto; horumarinta ereybixinta amniga saybarku ma aha oo keliya hawl horumarin afeed ee sidoo kale waa maalgashi qaran oo lagu kobcinayo aqoonta, lagu xoojinayo wacyiga bulshada, qeyb muhiim ahna ka ah dhismaha mustaqbal dhijitaal ah oo ammaan ah.

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo kaashanaysa khubarada iyo aqoonyahannada Akadeemiya-Goboleedka Af Soomaaliga (AGA) iyo Akademiyada Cilmiga, Dhaqanka iyo Suugaanta, waxaa sharaf weyn u ah in ay qeyb ka ahayd diyaarinta eraybixinta amniga saybarka, iskaashigan aqooneed waxa uu muhiim u ahaa in ereybixintu noqoto mid waafaqsan halbeegyada iyo hab-dhiska af Soomaaliga, islamarkaana suurtogelinaysa in la mideeyo adeegsiga ereyada farsamo iyo tarjumaadaha kala duwan, qeybna uu uga noqdo dadaalka horumarinta af Soomaaliga dhinacyada sayniska iyo teknoolajiyada, gaar ahaan amniga saybarka.

Waxa aan rajaynaynaa in buugyarahani noqdo tixraac qaran oo ay ka faa'iidaystaan hay'adaha dawladda, bahda waxbarashada iyo cilmibaarista, macallimiinta, ardayda, warbaahinta, xirfadlayaasha teknolajiyada iyo dhammaan bulshada Soomaaliyeed ee danaynaysa arrimaha amniga saybarka. Ereybixintan waxaa kale oo hubaal ah in ay wax weyn ka geysan karto in lagu diyaariyo afkeena sharciyada, siyaasadaha, manhajka, tababarrada iyo dukumentiyada farsamo ee la xiriira teknoolajiyada iyo amniga saybarka.

Waxa aan mahad iyo bogaadin u jeedinayaa aqoonyahannada, khubarada afka, xirfadlayaasha amniga saybarka iyo hay'adaha ka qayb qaatay ururinta, turjumidda, dib-u-eegista iyo tayeynta buugyarahan; waxa aan si gaar ah ugu mahadcelinayaa Guddiga Ereybixinta Teknolojiyada iyo Guddoomiyaha Guddiga, Prof. Cabdalla Cumar Mansuur, kaalintii muhiimka ahayd iyo dadaalkii ay ku bixiyeen diyaarinta, dib-u-eegista iyo tayeynta ereybixintan, dadaalkoodu wuxa uu saldhig muhiim ah u yahay horumarinta kaydka aqooneed ee af Soomaaliga iyo xaqiijinta in uu la jaanqaado isbeddellada joogtada ah ee teknoolajiyada casriga ah.



HABRAACA GUUD EE EREYBIXINTA

Prof. Cabdalla Cumar Mansuur
Guddoomiyaha Guddiga Ereybixinta Teknolajiyadda
Guddoomiyihii hore ee Akademiye Goboleedka af Soomaaliga (AGA)

Xilli kasta, waxaa dunida ku soo kordhaya waxyaabo aan horey loo aqoon, kuwaas oo u baahda in magac loo yeelo ama ereybixin loo sameeyo. Tiknoolajiyadda ayaa ka mid ah culuumta sida joogtada ah horumarka u sameynaysa, una baahan ereybixin joogto ah. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku, waxay bilowday ereybixinno taxane ah oo ku saabsan tiknoolajiyadda. Amniga Saybarka, oo safka hore uga jira tiknoolajiyadda cusub ee lagamamaarmaanka u ah nolosha iyo horumarka dunida, ayaa noqday bilowga taxanaha ereybixinnada, kaas oo u baahan in ereybixin af Soomaali ah loo sameeyo. Hay'adda Isgaariisnta Qaranka, Akadeemiya Goboleedka af Soomaaliga (AGA) iyo Akadeemiyada Cilmiga, dhaqanka iyo Suugaanta ayaa iska kaashaday in ereybixin loo sameeyo Amniga Saybarka. Waxaa arrintaa loo xilsaaray guddi saddexda hay'adood ka tirsan, aniguna aan guddoomiye u ahay. Ereybixintu waxay noqotay laancilmiyeed gaar ah, una baahan habraac iyo hannaan la adeegsado ama la raaco marka la sameynayo ee la abuurayo. Sidaa darteed, waxaan si kooban u soo bandhigayaa habraaca guud ee ereybixinta.

Marka la samaynaayo ereybixin, waxyaabaha ugu doorka roon ee loo baahanyahay, guud ahaan, in la adeegsado waa laba arrimood (B iyo T).

B) Si loo sameeyo erey cusub ama loo tumo, waxaa loo baahanyahay in loo adeegsado afar qaab:

1. In erey qalaad lagu beddelo erey Soomaaliyeed, oo micna ahaan wax la wadaagi kara ereyga qalaad, haba yaraatee. Tus.: cell (unug)
2. Haddii la waayo erey Soomaaliyeed oo u dhigma ereyga qalaad, laba erey ama in ka badan ayaa laysku lifaaqaa, sida: thermometer (kul+beeg > kulbeeg).
3. Ereyo horay u jiray ayaa lagu lifaaqaa dibkabayaal (-e, -ye, -le, -tooyo...), oo soo saaraya micne cusub, oo ka duwan midka ereyada laysku lifaaqay, sida: agaasin+e > agaasime, maaree+ye > maareeye, madax+tooyo > madaxtooyo.
4. Ereygii saddexdaa qaab wax looga qaban waayo, waxaa khasab noqonaysa in ereyga qalaad sidiisa loo qaato, af Carbeedka ayaana mudnaanta koowaad leh, kaddibna af Ingiriisiga, ereygaasoo dhawaaqiisa la Soomaaliyaynaayo. Tus.: juqraafi, kimisteri, ogsijiin.

T) Inta hawshaas lagu jirana, waxaa shardi ah in la ilaaliyo arrimaha soo socda:

1. Ereyga la bixinayaa, waa in uusan lahaannin qaab weereed sida: garaad macmal ah, oo uu lahaadaa qaab magac oo lagu lifaaqi karo qodob sida: garaad gacmeed+ka > garaad gacmeedka, xeer-ilaaliye+ka > xeer-ilaaliyaha.
2. In laga ilaaliyo tarjumaad toos ah.
3. In la doorto erey dadka badankoodu ay yaqaannaan ama fahmi karaan, amaba u cuntami kara.
4. Haddii mid guud ama la wada yaqaan la waayo, waa in la qaataa mid goboleed ama lahjadeed, midka uu ahaadaba.
5. In la mideeyo ereybixinta, iyadoo laga ambaqaadayo wixii horay loo sameeyay iyo kuwii dambaba, si looga baxo jahawareer ereybixineed.
6. In aan waqti la isaga luminnin in la beddelo erybixinnadii hore ee hirgalay, Soomaali iyo shisheeye waxay ahaadaanba, sida: **qalinjebin (*qalinbeddelasho), saacad (*goorsheegto), buug (dhigane), qore (dhige).
7. Si labadaa arrimood loo hirgeliyo, waxaa habboon in ereybixiyayaashu ay ka soo jeedaan gobollo kala duwan, aqoon kala duwanna in ay leeyihiin baa ka sii fiican.

A

No	English	Soomaali	Qeexid
1	Access	Idan	Waa awoodda ama oggolaanshaha lagu geli karo nidaam ama xog.
2	Adware (Advertisement Malicious Software)	Xayaysiindhibside, (Xayaysiis barnaamij Dhibside)	Nooc dhibside ah oo soo bandhiga xayeysiis aan la rabin, isla markaana inta badan la socda dhaqdhaqaaqa adeegsadaha.
3	Alert	Digniin	Farriin digniin ah oo ka timaadda nidaam amni marka la ogaado khatar ama isbeddel shaki leh.
4	Authentication	Sugid	Hannaanka lagu xaqiijinayo aqoonsiga adeegsadaha, aaladda, ama nidaamka.
5	Authorization	Awoodsiin	Habka lagu go'aamiyo waxa adeegsadaha sugan loo oggolyahay inuu sameeyo.
6	Availability	Helidkarid	Hubinta in nidaamyada, xogta, iyo adeegyadu ay shaqaynayaan, lana heli karo marka loo baahdo.
7	Access Control	Idanxakamayn	Habka lagu xakameeyo idanka la siinayo adeegsadaha nidaamyada, xogta, iyo agabka iyadoo lagu salaynayo xeerar la dejiyey iyo xuquuqda adeegsadaha.
8	Access Management	Idanmaarayn	Habraaca iyo teknoolojiyada loo adeegsado in lagu maareeyo gelidda, kormeeridda, iyo kala noqoshada adeegsadaha idan-uhelidda nidaamayada iyo xogta.

9	Attack Surface	Marinno Weerar	Dhammaan marinnada uu qof aan loo oggolayn u adeegsan karo inuu galo, weerarro, ama xog uga helo nidaam ama shabakad.
10	Authorization Control	Oggolaansho Xakamayn	hubinta in qof kasta oo nidaamka soo galay uu heli karo xogta ama shaqada loo oggolaaday, si aysan u dhicin inuu gaadho xog uusan idan u haysan.
11	Advanced Persistent Threat	Khatar-raagto Dahsoon	Weerar saybareed oo aad u horumarsan, kaas oo jabsaduhu si qarsoodi ah muddo dheer ugu sii jiro nidaam ama shabakad, si uu u xado xog ama ula socdo dhaqdhaqaaqyada nidaamka.

B

No	English	Soomaali	Qeexid
12	Backdoor	Marindahsoon	Hab qarsoon oo lagu dhaafo sugnaanta caadiga ah si idan la'aan loogu galo nidaamka.
13	Baseline	Barbilow	Bar tixraac oo lagu ogaado isbeddel ama waxaan caadi ahayn, oo ku yimaada habdhaqanka nidaamka.
14	Blackmail	Baad	Adeegsiga xog la xaday ama xasaasi ah, si loo baado dhibbane.
15	Botnet	Shabakad robot	Shabakad ka kooban aalado la jabsaday oo uu jabsaduhu meel fog ka maamulo si uu u fuliyo weeraro ballaaran.
16	Breach	Jabin	Marka qof ama koox aan idan u haysan ay si sharcidarro ah u dhexgalaan nidaam, shabakad, ama xogta la ilaaliyo
17	Blue Team	Kooxdifaac	Kooxda mas'uulka ka ah ilaalinta amniga nidaamyada, ogaanshaha khataraha, iyo kajawaabidda dhacdooyinka amniga
18	Buffer Overflow	Kaydbuuxdhaaf	Nuglaansho dhacda, marka barnaamij kaydkiisa ay gasho xog ka badan inta uu qaadi karo, taas oo suurtaggelin karta fulinta koodh aan la oggolayn.
19	Business Continuity	Hawljoogtayn	Hannaan iyo qorshe lagu xaqiijiyo in hawlaha ganacsi ee muhiimka ah ay sii joogteeyaan hawlaha, kaddib marka ay dhacdo xaalad amni ama musiibo.

20	Black Hat Hacker	Jabsade Dahsoon	Jabsade si sharcidarro ah u jabsada nidaamyada, si uu u xado xog, una geysto waxyeello, faldambiyeed ama uu u helo faa'iido dhaqaale.
21	Business Email Compromise	Jabsi Iimayl shaqo	Weerar xeeladaysan oo lagu beegsado shaqaalaha, iyadoo la iska dhigayo qof mas'uul ah ama lagu kalsoon yahay, si xog ama lacag looga helo.

C

No	English	Soomaali	Qeexid
22	Cipher	Qoraalqariye	Nidaam xisaabeed loo isticmaalo in xogta lagu qariyo ama lagu furo
23	Cipher text	Qoraal qarsoon	Qoraalka qarsoon oo aan la akhrin karin, oo ka dhasha marka la isticmaalo qoraalqariyaha
24	Compromise	Lawareegid	Marka jabsade si aan loo oggolayn u galo ama ula wareego nidaam, koonto (account), ama xog.
25	Confidentiality	Sir-ahaansho	Ilaalinta badqabka macluumaadka, si loo hubiyo inaanu helin qof aan loo oggolayn.
26	Containment	Xakameyn	Habka xaddididda faafidda ama saamaynta dhacdooyinka
27	Countermeasure	Tab-kahortag	Tallaabo kasta oo loo adeegsan karo in lagu yareeyo ama lagu baabi'iyo khataraha dhanka amniga saybarka.
28	Cryptography	Cilmi baaqxir	Cilmiga lagu ilaaliyo macluumaadka, iyadoo la adeegsanayo baaqxir iyo farsamooyin la xiriira
29	Cyberattack	Weerar saybar	Weerar ula kac ah oo lagu waxyeelleeyo, lagu carqaladeeyo ama lagu galo nidaam ama shabakad, iyadoo aan oggolaansho la haysan
30	Cybercrime	Dembi saybar	Nooc kasta oo faldambiyeed ah, oo la gaysto, iyadoo la adeegsanayo kombiyuutaro, shabakado, ama aaladaha dhijitaalka ah.

31	Cache Poisoning	Kayd-habaabin	Weerar lagu kharribo, laguna geliyo kaydka xog been ah, taasoo keenta in adeegsadayaasha loo diro bogag, adeegyo ama serferro waxyeello leh.
32	Certificate Authentication	Aqoonsisugid	Habka lagu xaqiijiyo aqoonsiga adeegsadayaasha, qalabka, ama adeegyada iyadoo la adeegsanayo shahaadooyin dhijitaal ah.
33	Change Management	Isbeddel Maamul	Hab nidaamsan oo lagu qorsheeyo, lagu maareeyo, laguna diiwaangelinayo isbedal kasta oo lagu sameynayo nidaamyada, si loo yareeyo khataraha amni.
34	Compliance Monitoring	Kormeer Uhoggaansanaan	Kormeer joogta ah oo lagu hubiyo in nidaamyada iyo habraacyadu ay u hoggaansanyihiin shuruucda iyo heerarka amni ee u degsan.
35	Configuration Management	Qaabmaarayn	Maaraynta iyo joogtaynta amni ee lagu dejiyo nidaamyada, qalabka iyo barnaamijyada, si ay u noqdaan kuwo ammaan ah.
36	Cyber Awareness	Wacyiqab Saybar	Wacyiga iyo ogaalka ay adeegsadayaasha internet-ku u leeyihiin khataraha saybarka iyo hababka looga gaashaanto.
37	Cyber Mindset	Habfeker Saybareed	Habfeker ku dhiirrigeliya qofka inuu si joogto ah uga feejignaado khataraha saybarka, isla markaana ka fiirsado tallaabo kasta oo uu qaadayo.
38	Cyber Resilience	U-adkaysi Weerarsaybar	Awoodda adkeysi uu nidaam ama hay'ad u leedahay weerarrada saybarka ama uga soo kaban
39	Cybersecurity Governance	Maamul Amni saybar	Qaabdhismeedka siyaasadaha iyo habraacyada lagu hago, laguna maamulo amniga saybarka ee hay'adda.

40	Critical Infrastructure Protection	Ilaalin Kaabayaal Halbowleed	Tallaabooyinka lagu sugo amniga kaabayaasha halbowlaha ah, sida: tamarta, biyaha, gaadiidka, caafimaadka, iyo adeegyada kale ee lagamamaarmaanka ah, si looga hortago khataraha saybarka ee saamayn kara qaranka iyo adeegyada guud.
41	Cyber Threat Intelligence	Lasocod Khatarsaybareed	Macluumaad la ururiyey, la falanqeeyey, kuna saabsan khataraha saybar oo dhici karta ama jirta; jabsadayaasha iyo farsamooyinka ay adeegsadaan, si loo xoojiyo difaaca amniga saybarka.
42	Cybersecurity Operations Center	Xarun hawlgal Amnisaybareed	Xarun dhexe oo si joogta ah ula socota, ogaata, falanqaysa, ugana jawaabta dhacdooyinka amniga saybarka 24/7.

D

No	English	Soomaali	Qeexid
43	Darkweb	Degel dahsoon	Qaybqarsoon oo internet-ka ah, xogteeduna dahsoontahay, laguna galo aaladaha sida (Tor), taas oo inta badan loo adeegsado hawlo sharcidarro ah.
44	Dashboard	Wajahad	Wajhadda hore ee degelka, si koobanna loogu soo muujiyo xogaha.
45	Decryption	Baaqfur	Habka qoraalka qarsoon (ciphertext) dib loogu celiyo qoraal caadi ah oo la akhrin karo
46	Defacement	Wajhadxumayn	Doorin ama beddelid aan la oggolayn oo lagu sameeyo muuqaalka ama wajahadda degel ama tusmooyinkiisa (inta badan dacaayad ahaan).
47	Detection	Kashifaad	Aqoonsasho ama kashifaad khatar amni, cillado aan caadi ahayn ama xaalado amni saybar.
48	Data Breach	Xogjabin	Xaalad ay xog xasaasi ahi ama nidaam uu u gacangalo cid aan loo oggolayn.
49	Data Classification	Kalasoocxogeed	Kala soocidda xogta, iyadoo loo eegayo heerka xasaasiyadeed ee ay leedahay, si loogu dabaqo ilaalinta ku habboon.
50	Data Encryption	Xogxir	Habka xogta looga dhigo qaab aan la akhrin karin, iyadoo laga ilaalinayo qof aan ogolaansho u haysan.

51	Defense InDepth	Difaac Lakabeysan	Hab amni oo adeegsada lakabyo difaac oo isdulsaaran si nidaamyada loo ilaaliyo.
52	Digital Certificate	Aqoonsi Dhijitaaleed	Aqoonsi dhijitaal oo loo adeegsado in lagu cadeeyo lahaanshaha furawadaagga iyo aqoonsi
53	Disaster Recovery	Kasookabasho Musiibo	Qorshayaasha iyo tallaabooyinka loo diyaariyo si dib loogu soo celiyo xogta, loona shaqaysiiyo nidaamyada, ka dib marka ay dhacaan weerarro saybar ama masiibooyin dabiici ah.
54	Data Loss Prevention	Kahortag Xoglumid	Siyaasado iyo Teknoolojiyo loogu talaggalay in lagu ogaado, loogana hortago in xogta xasaasi ah baxdo ama lunto.
55	Denial of Service	Adeeg Carqaladayn	Weerar lagu mashquuliyo nidaam, shabakad ama serfar, iyadoo la adeegsanayo qulqul baahan, si aysan u helin adeegsadayaasha idman.
56	Denial of Service Attack	Weerar Adeegcarqaladayn	Weerar lagu mashquuliyo nidaam, shabakad ama serfar, iyadoo la adeegsanayo qulqul baahan, si aysan u helin adeegsadayaasha idman.
57	Digital Identity Management	Maarayn aqoonsi Dhijitaal	Habraacyo iyo teknoolojiyado lagu maareeyo, laguna xaqiijiyo aqoonsiga dhijitaalka ah ee isticmaalaha, agabyada iyo adeegyada.
57	Distributed Denial of Service Attack	Adeegcarqaladayn Baahsan	Weerar adeegcarqaladeyn oo adeegsada agab kala duwan si uu u hantiyo nidaam ama adeeg la beegsaday, iyadoo la isticmaalayo qulqul baahsan.

E

No	English	Soomaali	Qeexid
59	Encryption	Baaqxir	Habka qoraal muuqda looga dhigo qoraal qarsoon oo aan la akhrin karin si xogta loo ilaaliyo.
60	Endpoint	Bardhammaad	Qalab ama aalad kasta oo ku xiran shabakad (laabtoob, taleefon, seerfar, qalab walxo internet (IoT) iyo wixii la mid ah).
61	Enumeration	Xog-ugaarsi	Si qotadheer u baarid nidaam, si loo ogaado magaca adeegsadaha, fariimawadaagga, adeegyada ama faahfaahinno kale.
62	Escalation	Awoodmaroorsi	Helidda mudnaan ama awood ka sarreysa ama ka badan intii uu haystay bilowgii hore (mudnaanboob).
63	Event	Dhacdo	Dhacdo kasta oo laga arki karo ama laga dareemi karo nidaam ama shabakad, kaas oo laga yaabo inuu tilmaamo arrin amnidarro.
64	Exploit	Kafaa-iidaysi	Tab ama afgarad (code) looga faa'iideysto nuglaanta, si nidaamka loo waxyeelleeyo.
65	Exposure	Baylah	Marka xog xasaasi ah, nidaam ama nuglaan uu jabsade awood ama idan ugu helo si aan loogu talaggelin.
66	Event Correlation	Iskuxirdhacdooyin	Falanqayn dhacdooyin amni oo badan, si loo kashifo hababka ay u dhacaan, loona ogaado xaaladaha dhabta ah.

67	Exposure Analysis	faaqidaad baylah	Qiimeynta iyo aqoonsiga meelaha ay nidaamyada, xogaha ama nuglaanshuhu ka muuqan karaan, oo si fudud weerar loogu soo qaadi karo.

F

No	English	Soomaali	Qeexid
68	Filtering	Shaandhayn	Hannaanka lagu oggolaanayo ama lagu horjoogsanayo qulqulka xogta, iyadoo lagu salaynayo xeerar amni oo qeexan.
69	Fingerprinting	Faraqaad	Uruurinta faahfaahin gaar ah oo ku saabsan nidaam la beegsanayo, si loo aqoonsado noociisa ama qaabdhismeedkiisa.
70	Firewall	Shabakad-ilaaliye	Qalab amni shabakad, kaas oo ilaaliya, xakameeyana qulqulka gudbaya/ galaya, iyadoo lagu salaynayo xeerar.
71	Flooding	Harqin	Harqin yool ama labeegsade, iyadoo la isticmaalayo qulqul xad-dhaaf ah (Tus., weerar adeegcarqaladayn baahsan) si looga dhigo mid aan la heli karin.
72	Firewall Policy	Siyaasad Shabakad Ilaaliye	Xeerar qeexaya qulqulka uu oggolaan karo ama horjoogsan karo shabakad ilaaliyuhu.

G

No	English	Soomaali	Qeexid
73	Gray Hat Hacker	Jabsade Maldahan	Jabsade maldahan oo raadiya nuglaanshaha nidaamyada, balse aan haysan oggolaansho buuxa, ujeeddadiisuna aysan ahayn inuu waxyeello geysto.

H

No	English	Soomaali	Qeexid
74	Hardening	Nidaam-adkayn	Hannaanka badqabka nidaam, iyadoo la yareynayo weerarrada (sida: kasaaridda adeegyada aan muhiimka aheyn, hawlgelinta iintire iyo wixii la mid ah).
75	Hashing	Summadayn	Xogqarincilmiyeed haldhinacle ah, taas oo u rogta xogta silsilad leh cabbir go'an, si loo sameeyo baaritaan hufan ama kaydinta furasireedka.
76	Honeynet	Shabakad-dabineed	Shabakad leh dhowr dabin, oo loogu talaggalay in loo ekaysiiyo jawi run ah ama caadi ah.
77	Honeypot	Dabinqool	Nidaam dabinqoolid oo loo diyaariyay in lagu soo jiito ama lagu daraaseeyo qaabdhaqanka weeraraha.
78	Hash Function	Xogsummadayn	Algoriisam xisaabeed xogta u baddela summadayn cabbir go'an, si loogu xaqiijiyo sugnaanta xogta ama loogu kaydiyo furasireedka.

No	English	Soomaali	Qeexid
79	Incident	Xaalad	Dhacdo amni oo hubaal ama xaqiiqo ah oo waxyeellaysay ama waxyeellayn karta amniga.
80	Integrity	Xogsugid	Hubsashada inay xogtu sax tahay oo aanay cid kale baddelin (saddex-geeslaha: qarsoodi, hufnaan, helidkarid (QHH)).
81	Identity Theft	Xatooyo aqoonsi	Xatooyada macluumaadka shakhsi leeyahay, si qofkaasi la iskaga dhigo, ujeedkuna yahay khayaano, dhibaato iyo ujeeddooyin kale oo xun.
82	Identity Verification	Aqoonsihubin	Xaqiijinta in qofka ama hay'addu tahay cidda ay sheeganayaan, xilliga lagu jiro aqoonsi sugidda.
83	Incident Escalation	Sare-ugudbin Xaaladeed	Habraac loogu gudbinayo xaalad amni maamulka sare, si taageero loo helo ama loo xalliyo.
84	Incident Handling	Xaalad Latacaalid	Habdhismeed lagu kashifo, falanqeeyo, xakameeyo, loogana soo kabsado xaalado amni.
85	Incident Management	Xaaladmaarayn	Hannaanka guud ee udiyaargarowga, kajawaabidda iyo waxkabarashada xaaladaha amni.
86	Incident Response	Kajawaabid Xaalad	Habraaca wanaagsan ee xaawaraha sare leh ee kashifaadda, xakamaynta, baaritaanka iyo kasookabashadda weerarro saybar ama xogjabsi.
87	Information Assurance	Macluumaad Hubin	Qaab lagu ilaalinayo macluumaadka iyo nidaamyada, iyadoo la marayo xogsugid, helitaan xog, bedqab iyo xogsiraysi.

88	Information Security	Macluumaad Amni.	Ilaalinta macluumaadka iyo nidaamyada, si looga badbaadiyo gelid, isticmaalid, bannaan dhigid, carqaladayn, ama burburin idan la'aan ah.
89	Intrusion Detection	Kashifaad Dhexduse	Kormeeridda nidaamyada ama shabakadaha, si loo kashifo dhaqdhaqaaqyada ujeedka xun leh, ama siyaasadaha xadgudubka.
90	Identity Access Management	Maarayn Idan-aqoonsi	Hannaan iyo agab lagu maareeyo aqoonsiyada dhijitaalka, laguna xakameeyo idan helida adeegsadaha, laguna xoojiyo sugida iyo fulinta siyaasadaha.
91	Intrusion Prevention	Kahortag Dhexduse	Si firfircoon u xannibid dhexdusaha la kashifay ama dhaqdhaqaaqyada kale ee ujeedka xun leh, xilliga saxda ah.
92	Indicators of Compromise	Tilmaamayaal Waxyeello	Tilmaamo ama caddeymo ((IP addresses, domains) muujinaya suurtaggalnimada in qayb ka mid ah nidaam ama xog la jabsaday.
93	Intrusion Detection System	Nidaam kashifid Dhexduse	Agab amni oo kormeera dhaqdhaqaaga shabakadda ama nidaamka, si loo aqoonsado habdhaqanka dhibsidaha ama jabin xeer
94	Intrusion Prevention System	Nidaam Kahortag Dhexduse	Agab amni oo si feejigan u kashifa, una xanniba suurtaggalnimada weerar dhexduse oo dhaca waqtiga dhabta ah.

K

No	English	Soomaali	Qeexid
95	Kernel	Xuddun	Qaybaha xuddunta ah (muhiim) ee nidaam hawlfulineed, kuwaas oo maareeya ama maamula qalabka iyo ilaha nidaamka (marmar waxaa beegsada ama weerara isqariye).
96	Keylogger	Qoraal Gurbiye	Dhibside kaydiya wax kasta uu qofku ku qoro furahayaha (keyboard) kombiyuutarka

L

No	English	Soomaali	Qeexid
97	Least Privilege	Mudnaanxadayn	Mabda' qof ama nidaam lagu siinayo oggolaanshaha ugu yar ee lagama maarmaanka u ah, si uu hawshiisa u qabsado.
98	Log Management	Diiwaanmaarayn	Ururinta, kaydinta, falanqaynta, sugidda nimaadka iyo diiwaannada amniga, si loogu adeegsado kormeerid iyo baaritaanno.

M

No	English	Soomaali	Qeexid
99	Malware	Dhibside	Barnaamij kasta oo ujeedkiisu yahay inuu waxyeelleeyo, ka faa'iidaysto, ama si oggolaansho la'aan ama idan la'aan u galo nidaamyada.
100	Malware Analysis	Faaqidaad dhibside	Habraaca lagu baarayo barnaamij dhibside, si loo fahmo habdhaqanka, awoodda iyo saamaynta uu leeyahay.

101	Multi-Factor Authentication	Habsugid badane	Hab amni oo u baahan in loo adeegsado laba hab ama ka badan, si loo hubiyo aqoonsiga, loona xaqiijiyo adeegsadaha.

N

No	English	Soomaali	Qeexid
102	Network Monitoring	Shabakad Kormeerid	Joogtaynta lagu kormeerayo qulqulka shabakadda iyo dhaqdhaqaaqyada, si loo ogaado dawdhaafyada (cilladaha aan caadiga ahayn) iyo arrimaha kale ee amnidarrada.

O

No	English	Soomaali	Qeexid
103	One-Time Password OTP	Furasireed marle	Furasireed loogu talagalay in hal mar la isticmaalo, si loo xaqiijiyo aqoonsiga adeegsadaha nidaamka.

P

No	English	Soomaali	Qeexid
104	Password	Furasireed	Xarfo ama summado sir ah, oo loo isticmaalo sugidda aqoonsiga adeegsadaha.
105	Patch	Iintire	Cusboonaysiin barnaamijeed oo lagu hagaajiyo nuglaanshaha ama cilladaha.
106	Payload	Dhibfuliye	Koodh ama qayb waxyeello leh oo uu keeno fursadgaade ama dhibside.

107	Phishing	Jillaabasho	Weerar dadka lagu dago, oo burcadda internet-ku ay isku ekaysiiyaan cid lagu kalsoonyahay, si ay u xadaan aqoonsiyada ama xogta.
108	Plaintext	Qoraalmuuqda	Xog asal ah, oo aan la sirxirin, lana akhrin karo.
109	Portscan	Illinbaar	Farsamo loo adeegsado in lagu aqoonsado illinnada furan iyo adeegyada shaqaynaya ee nidaamka bartilmaameedka ah.
110	Proxy	Wakiil dahsoon	Seerfar dhexeeye ah oo gudbiya codsiyada, laguna qarin karo isha asalka ah.
111	Packet Filtering	Xirmashaandhayn	Hannaan lagu baaro xirmooyinka xogta ee shabakadda dhexmara, si loo oggolaado ama loo horjoogsado, iyadoo la raacayo xeerar horay loo dejiyay.
112	Password Cracking	Furasireedjabin	Iskuday lagu soo helayo ama lagu qiyaasayo furasireedka, iyadoo la isticmaalayo habka xoogkujabsiga (brute force) ama farsamooyin kale.
113	Patch Management	Iintira maarayn	Iskuday lagu soo helayo ama lagu qiyaasayo furasireedka, iyadoo la isticmaalayo habka xoogkujabsiga (brute force) ama farsamooyin kale.
114	Penetration Testing	Difaac tijaabin	Weerarro saybar oo loo ekaysiiyay kuwo dhab ah, si loo aqoonsado nuglaanta looga faa'iideysan karo jabsashada nidaamyada, ka hor intaysan dhicin weerarrada dhabta
115	Policy Enforcement	Dhaqangelin Siyaasadeed	Hubinta in xeerarka iyo siyaasadaha amniga si joogto ah looga hirgaliyo dhammaan qaybaha hay'adda.
116	Private Key	Fure gaar	Koodh xogqarineed oo qof keliya uu ogyahay, lagu sirfuro xog, lagu macaamilo, lagu galo boorsooyinka dhijitaalka ah, laguna caddeeyo lahaanshaha.

117	Privilege Escalation	Mudnaanboob	Ka faa'iidaysiga nuglaanta nidaamka, si adeegsaduhu uu u helo xuquuq iyo awood ka sarreysa middii hore la siiyay.
118	Proxy Server	Seerfarwakiileed	Seerfar dhexe, oo maamula codsiyada u dhexeeya macaamiisha iyo seerfarada, badanaana loo adeegsado amni ama qarin aqoonsi.
119	Public Key	Fure guud	Fure guud, oo loo wadaagi karo si furan, loona adeegsado sirqarinta iyo hubinta sixiixa.
120	Public Key Infrastructure	Kaabayaal Fure guud	Nidaam ka kooban qalab, barnaamij, siyaasado, iyo habraacyo lagu maareeyo aqoonsiga dhijitaalka ah iyo sirxiridda furaha guud.

R

No	English	Soomaali	Qeexid
121	Ransomware	Barnaamij Madaxfurasho	Dhibside sirxiraya galalka ama nidaamyada, dalbadana lacag madaxfurasho ah si loo sirfuro xogaha.
122	Reconnaissance	Sahan	Marxaladda bilowga ah ee ururinta macluumaadka ku saabsan bartilmaameedka, ka hor weerarka.
123	Remediation	Cilladbixin	Habka lagu hagaajiyo ama lagu saaro sababta asalka ah ee dhacdada amniga.
124	Rootkit	Dhibside Isqariya	Dhibside loogu talagalay inuu qariyo jiritaankiisa, siina joogteeyo mudnaanta gelitaanka ee nidaamka.
125	Red Team	Kooxweerar	Koox fulisa weerarro tijaabo rasmi ah, si ay u ogaato nuglaanshaha ka jira nidaamyada, una qiimayso difaacyadooda.

126	Reverse Engineering	Farsamo isirraac	Falanqaynta barnaamij ama qalab si loo fahmo qaabkiisa, shaqadiisa, ama daaha looga qaado nuglaanshihiisa.
127	Reverse Proxy	Wakiil kaaliye	Seerfar wakiileed soo gudbiya xogta macaamiisha, isagoo ka soo helaya seerfarada dambe, badanaana loo isticmaalo dheellitirka culayska shaqada iyo amniga.
128	Risk Assessment	Halisqiimayn	Habka lagu aqoonsado, lagu falanqeeyo, laguna qiimeeyo khataraha amni ee suurtagalka ah.
129	Risk Management	Halismaarayn	Iskuduwidda hawlaha lagu hago, laguna xakameeyo khataraha amniga saybarka ee ku wajahan hay'adda.
130	Risk Mitigation	Halisyarayn	Tallaabooyin la qaaday si loo yareeyo dhibaatooyinka daran ama saameynta khataraha ama nuglaanta.
131	Rootkit Detection	Kashifaad isqariye Dhibside	Farsamooyin iyo agabyo loo adeegsado in lagu aqoonsado barnaamij dhibside qarsoon, kaas oo loo sameeyay inuu siijoogteeyo mudnaanta gelitaanka.

S

No	English	Soomaali	Qeexid
132	Sandbox	Goobtijaabeed	Degaan gaar ah oo loo adeegsado in si ammaan ah loogu fuliyo, laguna falanqeeyo koodh laga shakisanyahay.
133	Scanning	Baaritaan	Si waxtar leh in loo baaro shabakado ama nidaamyo, si loo aqoonsado nuglaanshaha ama adeegyada furan.
134	Segmentation	Kalaqoqob	U kala qaybinta shabakad qaybo yaryar, si loo xaddido jihada dhaqdhaqaaqa ee jabsadaha.
135	Sniffing	Sir-ugaarsi	Qabashada iyo falanqaynta dhaqdhaqaaqa qulqulka shabakadda, si loo xado macluumaad xasaasi ah.

136	Spoofing	Haybjilid	Been-abuurka xogta (cinwaanka IP-ga, iimaylka, DNS-ka, iwm.) si laysugu ekaysiiyo ilo lagu kalsoon
137	Spyware	Basaasdhibside	Dhibside si qarsoodi ah ula socda, oo ururiya macluumaadka adeegsadaha.
138	Security Metrics	Halbeeg amni	Koox fulisa weerarro tijaabo rasmi ah, si ay u ogaato nuglaanshaha ka jira nidaamyada, una qiimayso difaacyadooda.
139	Security Monitoring	Kormeer amni	La socodka joogtada ah ee nidaamyada, shabakadaha iyo diiwaannada, si loo ogaado khataraha amniga iyo waxyaabaha aan caadiga ahayn.
140	Security Operations	Hawlgal amni	Hawlaha maalinlaha ah ee ku lugta leh socodsiinta iyo joogtaynta qaabka amniga ee hay'adda.
141	Security Policy	Siyaasad amni	Qoraal rasmi ah oo qeexaya xeerarka, heerarka, iyo mas'uuliyadaha lagu ilaaliyo hantida hay'adda.
142	Social Engineering	Dad dagid	Marinhabaabinta dadka si ay u bixiyaan macluumaad sir ah ama u sameeyaan falal waxyeellaynaya amniga.
143	SQL Injection	Weerar sql	Weerar koodh dhibside oo SQL ah lagu gelinayo nidaam, si loo maamulo ama loo helo xogta ku jirta xogdhigga.
144	Secure Sockets Layer SSL	Iskuxir lakab Ammaan	Habmaamuuska sirta ah ee laga gudbay (ka horreeyay TLS), loona adeegsado in lagu sameeyo xiriirro sir ah oo u dhexeeya macaamiisha iyo serfarada, si loo helo isgaarsiin ammaan ah.
145	Security Event Management	Maarayn dhacdo Amni	Habka ururinta, lasocodka, iyo iskuxirka dhacdooyinka amniga ee laga helo ilo kala duwan, si loo ogaado suurtagalnimada dhacdada.
146	Security Operations Center	Xarun hawlgal Amni	Xarun dhexe oo si joogta ah ula socota, ogaata, falanqaysa, kana jawaabta dhacdooyinka amniga

T

No	English	Soomaali	Qeexid
147	Threat	Khatar	Khatar suurtagal ah, oo looga faa'iidaysan karo nuglaansho, sababi kartana waxyeello.
148	Trojan	Torojaan	Dhibside iska dhiga barnaanij sharci ah, kuna khiyaameeya adeegsadayaasha inay soo degsadaan.
149	Threat Detection	Khatar kashifid	Kashifaadda khataraha saybarka ee suurtagalka ah ama jira, iyada oo loo marayo la socod iyo falanqayn.
150	Threat Hunting	Khatargoob	Hore-uraadinta khataraha ay qabanwaayeen aaladaha ogaanshaha ee otomaatigga ah.
151	Threat Intelligence	Dabaggal Khatar	Hore-uraadinta khataraha ay qabanwaayeen aaladaha ogaanshaha ee otomaatigga ah.
152	Threat Modeling	Khatar habayn	Hab nidaamsan oo lagu aqoonsado, qiyaaso, laguna maareeyo khataraha suurtagalka ah ee ku wajahan nidaamka.
153	Transport Layer Security TLS	Lakabgudbineed Amni	Habmaamuus xogqarineed oo caawiya ammaanka gudbinta isgaarsiinta aan sugnayn ee kombuyuutarka iyo shabakadaha sida: internet-ka.

U

No	English	Soomaali	Qeexid
154	User Authentication	Adeegsade sugid	Hubinta aqoonsiga adeegsade isku dayaya inuu galo nidaam.

V

No	English	Soomaali	Qeexid
155	Vulnerability Assessment	Qiimayn nuglaan	Qiimeyn nidaamsan oo lagu sameeyo nidaamyada si loo ogaado, loona kala horaysiiyo nuglaanta
156	Vulnerability Mitigation	Nuglaanyarayn	Tallaabooyin la qaaday, si loo yareeyo ama loo baabi'iyo halista ka dhalan karta nuglaanshaha la aqoonsaday.
157	Vulnerability Scanning	Nuglaanbaarid	Adeegsiga agab otomaatig ah, si loo baaro nuglaanta la ogyahay ee nidaamyada iyo shabakadaha.

W

No	English	Soomaali	Qeexid
158	Worm	Gooryaan	Dhibside istarmiya oo ku faafa shabakadaha, isaga oo aan u baahnayn la falgal adeegsade.
159	White Hat Hacker	Jabsade Idman	Jabsade si sharci ah u tijaabiya nidaamyada iyo shabakadaha, isagoo haysta oggolaansho, si uu u ogaado nuglaanshaha ka hor inta uusan weerar jabsi dhicin.

Z

No	English	Soomaali	Qeexid
160	ZeroDay	Diimmoonaan Haliseed	Nuglaansho aan hore loo aqoon, kaas oo aanu jirin wax iintire ama halisyarayn ah waqtiga la ogaaday.
161	Zero Trust Architecture	Qaab Hubinjoogtayn	Hannaan amni oo baabi'iya kalsoonida qarsoon, una baahan hubin joogta ah oo adeegsade, qalab, iyo macaamil walba, iyadoo aan loo eegin goobta uu joogo.
162	Zero Trust	Hubinjoogtayn	Hab amni oo sheegi kara in adeegsade ama qalab aan lagu kalsoonaan karin, una baahan xaqiijin joogta ah.





www.nca.gov.so
www.aga.so
www.somasa.gov.so